



# Hogaamiyayaal ka socda Jason Lee, Woodlawn ee u adeegaya qareenka u dooda ardayda Latino

Laba hoggaamiye dugsi oo ka socda Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland ayaa loo xushay inay wehel u noqdaan urur qaran oo u dooda ardayda Latino iyo bartayaasha Ingiriisiga.

IIsaac Cardona, maamulaha dugsiga hoose ee Jason Lee, iyo Alma Velazquez, kaaliyaha maamulaha dugsiga Woodlawn PK-5, waxay ka mid yihiin 15 hoggaamiye dugsi oo ka kala socda daafaha dalka si ay ugu adeegaan. [saxxiibada u ah Machadka Qaran ee Hoggaamiyeyaasha Dugsiga Latino \(NILSL\).](#)

“Waa hoggaamiyayaal ku leh aaminaad iyo taariikh bulshadooda, kuwaas oo si daal la'aan ah ugu hadla oo muujiyey saameyn, waxayna u keenaan aragtiyo kaladuwan sidi macallimiin xilliyeed, hoggaamiyayaal aan faa'iido-doon ahayn, maamuleyaal iyo aqoonyahannada ardeyda, ”ayay hay'addu ku sheegtay war-saxaafadeed ay soo saartay saaxiibadood, kuwaas oo laga soo xulay koox codsadayaal oo tartan adag leh.

Cardona wuxuu usoo shaqeeyay Jason Lee ilaa iyo sanadkii 2015, markaas oo ka bilaabay asagoo noqday kaaliyaha maamulaha, kadibna noqday maamule sanadku markuu ahaa 2016. Wuxuu si xoog leh ugu ololeeyey sinnaanta, wuxuuna dejiyay habab badan oo lagula xiriiriyo ardayda iyo qoysaska, oo ay ku jiraan [WatchDOGS \(Aabayaasha Ardayda Wanaagsan\) dhacdada \(WatchDOGS \(Dads of Great Students\) event \)](#) oo keenaysaaabayaal, awoowayaal, adeero iyo xubno kale oo qoyska ah fiidka Pizzaha, ciyaaro iyo isku xirnaan, iyo [isbuucii "Maylka Subixi" socod iyo orod](#) si loogu dhiirigeliyo ardayda iyo waalidiinta inay ku lug yeeshaan nashaadaadyada jir ahaaneed. Dhacdooyinka ayaa had iyo jeer loogu talagalay inay la jaan qaadaan dhaqanka Jason Lee, taas oo ay ku jiraan bulsho weyn oo ku hadasha luuqada Isbaanishka.

Velazquez waxay ku jirtaa sannadkeedii labaad oo ay tahay kaaliyaha maamulaha ka dib markii ay uso shaqeysay macalin dhigo laba luqadeed iyo macalin ka qabta meelayn gaar ah PPS ilaa iyo 2009. Gabadha shaqaalaha shirkada soogalootiga, Velazquez waxay muddo dheer u doodaysay ardayda iyo qoysaska Hispanic-ga ah, dadaalkeeda ku aaddan kaqaybgalinta ardayda doodaha ku saabsan isirka iyo caddaaladda ayay ku muteysatay Abaalmarinta Barashada iyo Baridda Ugu saraysa (Summit Learning and Teaching Award).

Kooxda NILSL ee 2019 waxaa ku jira aqoonyahanno ka socda California, Arkansas, Colorado, Michigan, Missouri, Ohio, Oregon, Tennessee iyo Texas. NILSL waxaa la aasaasay 2011 by UnidosUS (oo hore loogu magacaabay Golaha Qaranka ee La Raza) iyada oo lala kaashanayo Mu'asasada Bill & Melinda Gates. Waxay u diyaarineysaa aqoon khibrad leh iyo hogaamiyasha bulshada inay u doodaan siyaasadaha heer qaran iyo heer gobol si loo xoojiyo waxbarashada ardayda Latino iyo bartayaasha Ingiriisiga.

Cardona iyo Velazquez ayaa horay uga qeybqaatey kulan tababar ah horaantii bishaan kaas oo ka dhacay Nashville, Tenn.